



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad**

**Documentiga Kalfadhiga:8-aad kulankiisa:18-aad**

**Tr:15.06.2016**

---

**Kalfadhiga 8-aad**

**Kulankiisa: 18-aad, sacada furitanka, 12:40 gh, sacad xiritanka.1:15 gd.**

**Guntinta:148 xildhibaan**

**Ajendaha:-**

**1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**

**2.Ansixinta Ajendaha**

**3.Ku dhawaaqista natiijadda codeynta Mashruuc Sharci wax ka beddelid Dastuur.**

**Sh-Guddoomiye,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:jeylani Nuur likar.**

**1.Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.**

**2.Guddoomiye ku xigeenka 1aad wuxuu xildhibaanada u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha xildhibaanada wey ansixiyeen ajendaha.**

**3.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay, in uu Xogha'yaha Golaha Shacabka Mudane:Cabdikariim Xaaji Buux,uu furo sanduuqa lagu riday waraaqaha codka lagu qaaday si natiijadda loo soo saro.**

**Xogha'yaha Golaha Shacabka Mudane:Cabdikariim Xaaji Buux,wuxuu sheegay in ay codeysay 215 xildhibaan, Xogha'yaha wuxu soo jeediyay Qodobka.134 –aad, Qaybaha ku dabaqma wax ka beddelka Dastuurka ee la soo jeediyay ka hor inta aanay dhamaan muddada koowaad ee wakhtiga Baarlamaanka federaalka.**

Guddoomiye,ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,wuxuu soo jeediyay, Xogha'yaha Golaha Shacabka in uu furo sanduuqa codbixinta si loo ogaado natiijadda Mashruuc Sharci wax ka beddelid Dastuur.

Codkii Sidan ayuu u dhacay.

**Inta Ogot \_\_\_\_\_ 208 xildhibaan**

**Inta Diidan \_\_\_\_\_ 4 xildhibaan**

**Inta ka Aamustay \_\_\_\_\_ 3 xildhibaan**

**Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,wuxuu ku dhawaaqay codkii loo qaaday Mashruuc Sharci wax ka beddelid Dastuur waa ansax.**

**Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:jeylani nuur likar,waxan u sheegaya shacabka Soomaaliyeed iyo adinkaba in ay xaq ulayihiin Baarlamaanka in laba daas qodob oo ay wax ka beddaleen uu ansax yahay,waxaa la faraya in la wargaliyo hay'adaha ay quseyso oo ay qatan hirgaliyan,waxan idiin sheegaya madama ayna wax ajende ah inoo oolin in uu xiran yahay shirka, waxan qaadaneyna fasax cibaadeysi,waxan usu soo laaban doona bacdal ciid insha allah.**

**Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:18-aad,uu shir Guddoominayay,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:15 gd.**